١٢٢- ((لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ الْعَظِيمُ الْحَلِيمُ، لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ رَبُّ الْعَرْشِ الْعَظِيمُ، لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ رَبُّ السَّمَوَاتِ وَرَبُّ الأَرْضِ وَرَبُّ الْعَرْشِ الْكَرِيمُ)).

122- {laa ilaaha illallaahu al-cadiimul-xaliim, laa ilaaha illallaahu rabbul carshil cadiim, laa ilaaha illallaahu rabbus-samaawaati wa rabbul-ardi wa rabbul-carshil-kariim}

"ilaah xaq lagu caabudo majiro, ilaaha

weyn ee dulqaadka badan mooyee, ilaah xaq lagu caabudo majiro, ilaaha carshiga weyn leh mooyee, ilaah xaq lagu caabudo majiro, ilaaha cirarka iyo dhulka iyo carshiga wanaagsan rabigooda ah mooyee".

١٢٣- (( اللَّهُمَّ رَحْمَتَكَ أَرْجُو فَلا تَكِلْنِي إِلى نَفْسِي طَرْفَةَ عَيْنٍ ، وَأَصْلِحْ لِي شَأْنِي كُلَّهُ، لا إله إلا أَنْتَ )).

123- {allahumma raxmataka arjuu falaa takilnii ilaa nafsii darfata caynin, wa aslix lii sha>nii kullahu, laa ilaaha illaa anta}

<> allow naxariistaada ayaan rajaynayaa, ee ha igu dayn naftayda il-biriqsi, iina hagaaji arinkayga dhamaantiis, ilaah majiro xaq lagu caabudo adiga mooyee>>.

١٢٤- ((لاَ إِلَهَ إِلاَ أنتَ سُبْحَانَكَ إِنِّي كُنْتُ مِنَ الظَّالِمِيْنَ ))

124- {laa ilaaha illaa anta subxaanaka innii kuntu minddaalimiin}
"ilaah xaq lagu caabudo majiroadiga mooyee, waxaanad ka hufantahay xumaan, anigu waxaan kamid ahaa kuwa daalimiinta(dambiilayaasha) ah (ee ii dambi dhaaf)" .

١٢٥- ((اللّه اللّه رَبِّي لاَ أُشْرِكَ بِهِ شَيْئاً)).

125 - {allaahu,allaahu rabbii, laa ushriku bihi shay-an}
<> ilaahay ayaa ah rabigay,lamana wadaajinayo ilaahay waxna>>.

36- Ducada kulanka cadowga iyo qofka awooda leh.

١٢٦- ((اللَّهُمَّ إِنَّا نَجْعَلُكَ فِي نُحُوْرِهِمْ وَنَعُوْذُ بِكَ مِنْ شُرُورِهِمْ ))

126- {allahumma innaa najcaluka fii nuxuurihim wa nacuudu bika min shuru-urihim}.

"allow waxaan kaa yeelnay dhuuntooda(laa), waxaana kaa magan galaynaa shararkoodo".

-١٢٧ (( اللَّهُمَّ أَنْتَ عَضُدِي، وَأَنْتَ نَصِيرِي، بِكَ أَحُولُ، وَبِكَ أَصُولُ، وبِكَ أُقَاتِلُ )).

127- { Allahumma anta cadudii, wa anta nasiirii, bika axuulu, wa bika asuulu, wa bika u qaatilu}.

<> allow adigu garabkaygaa tahay, adiguna gargaarahayga ayaa tahay, adigaan awood ku leeyahay, adigaana ku diriraa, adigaana ku dagaalamaa».

-١٢٨ (( حَسْبُنَا اللّٰه وَنِعْمَ الوَكِيلُ )).

128- {xasbunallaah wa nicmal wakiil}.

<> waxaa nagu filan ilaahay, cid talo loo dhiibtana isagaa ugu fiican>>.

37.Ducada qofka kacabsada dulmiga(gar darrada) suldaanka(madaxda).

-١٢٩ (( اللَّهُمَّ رَبَّ السَمَوَاتِ السَبْعِ وَرَبَّ الْعَرْشِ الْعَظِيمِ، كُنْ لِي جَاراً مِنْ فُلَانِ بنِ فُلانٍ وَأَحْزَابِهِ مِنْ خَلَائِقِكَ؛ أَنْ يَفْرُطَ عَلَيَّ أَحَدٌ مِنْهُمْ أَوْ يَطْغَى، عَزَّ جَارُكَ، وَجَلَّ ثَنَاؤُكَ، وَلا إِلَهَ إِلا أَنْتَ))

129-{Allahumma rabbassamaawatissab-ca wa rabbal-carshilcadiim, kun lii jaaran, calaa fulaan ibnu fulaan wa axzaabihi min khalaaiqika an yafruda calayya axa-dun minhum aw yadqaa, cazza jaaruka wa jalla thanaa-uka walaa ilaaha illaa anta}

"allow rabigii todobada cir rabigooda ahaayow, carshiga weyna rabigiisa ahaayow, iiga noqo badbaadiye hebal hebal iyo xulufadiisa oo kamid ah uunkaaga, in qof kamid ihi iyaga igu xad gudbo,ama igu qooqo (kibro), waxaa weyn allow magan galintaada waxaana weyn ammaantaada, ilaah xaq lagu

caabudaana majiro adiga mooyee".

١٣٠- ((اللّٰه أَكْبَرُ، اللّٰه أَعَزُّ مِنْ خَلْقِهِ جَمِيعاً، اللّٰه أَعَزُّ مِمَّا أَخَافُ وَأَحْذَرُ، أَعُوذُ بِاللّٰهِ الَّذِي لا إِلَه إِلا هُوَ، المُمْسِكِ السَّمَاوَاتِ السَّبْعِ أَنْ يَقَعْنَ عَلَى الأَرْضِ إِلا بِإِذْنِهِ، مِنْ شَرِّ عَبْدِكَ فُلانٍ، وَجُنُودِهِ وَأَتْبَاعِهِ وَأَشْيَاعِهِ، مِنَ الجِنِّ وَ الإِنْسِ، اللَّهُمَّ كُنْ لِي جَاراً مِنْ شَرِّهِمْ، جَلَّ ثَنَاؤُكَ وَعَزَّ جَارُكَ وَتَبَارَكَ اسْمُكَ، وَلا إِلَه غَيْرُكَ ))ثَلاثَ مَرَّاتٍ.

130- {allaahu akbar, allaahu acazzu min khalqihi jamiican, allaahu acazzu mimmaa akhaafu wa axdaru, wa acuudu billaahi alladii laa ilaaha illaa huwa, almumsiki assamaawaati assabci an yaqacna calal ardi illaa bi idnihi, min sharri cabdika fulaanin, wa junuudihi wa atbaacihi wa ashyaacihi, minal jinni wal insi, allaahumma kun lii jaaran min sharrihim, jalla thanaauka wa cazza jaa-

ruka, wa tabaarakasmuka, walaa ilaaha qayruka} . saddex mar

< allaa weyn, allaa ka adag uunkiisa oo dhan, allaa ka adag waxa aan ka baqayo een ka digtoonaanayo, waxaan u magan galayaa ilaahayga uusan jirin ilaah xaq lagu caabudo isaga mooyee, allaha ka haya cirarka todobada ah inay kusoo dhacaan dhulka inuu u idmo mooyee, sharka adoonkaaga hebal ah, iyo ciidankiisa, kuwa raacsan iyo kooxihiisaba oo kamid ah jin iyo insiba, allow iiga ahaw badbaadiye sharkooda, waxaa weyn ammaantaada, waxaana adag badbaadadaada,waxaana sareeya magacaaga, mana jiro ilaah xaq lagu caabudo oon adiga ahayn > .

38.Habaarida cadowga.

١٣١- ((اللَّهُمَّ مُنزِلَ الكِتَابِ، سَرِيعَ الحِسَابِ،

اهْزِمِ الأَحْزَابَ، اللَّهُمَّ اهْزِمْهُمْ وَزَلْزِلْهُمْ))

131-{allahumma munazzilal-kitaabi sariical-xisaabi, ihzim al-axzaaba al-lahumma  hzimhum wa zalzilhum}
"allow allihii kitaabka soo dajiyayow, xisaabtiisuna dagdaga badnaydow, jabi gaashaanbuurta, allow jabi oo gilgil".

39.Ducada qofka kacabsada qolo.

-١٣٢  ((اللَّهُمَّ اكْفِنِيهِمْ بِمَا شِئْتَ )).

132- {allahumma ikfiniihim bimaa shi-ta}
"allow igaga filnow waxaad doonto".

40.Ducada qofka uu ku dhaco shaki xagga iimaanka dhexdiisa ah.

-١٣٣  ((  يستعيذُ باللّٰه )).
- ((ينتهي عَمَّا شَكَّ فيهِ)) .

133- - ((Shaydaanka ayuu iska naari)).
- (( wuxuu ka hari (reebtoomi) wixii uu ka shakiyay)).

-١٣٤ يَقُولُ (( آمنت باللّٰهِ وَرُسُلِهِ)).

134- (Wuxuuna dhihi:{aamantu billaahi wa rasulihi}

< waxaan rumeeyey ilaahay iyo rusushiisa >.

-١٣٥ يقرأ قوله تعالى: (( هُوَ الأَوَّلُ وَالآخِرُ وَالظَّاهِرُ وَالبَاطِنُ وَهُوَ بِكُلِّ شَيءٍ عَلِيْمٌ)).

135- wuxuu akhriyi qawlka ilaahay: {huwal awwalu wal-aakhiru waddaahiru wal-baadinu wa huwa bikulli shay-in caliim}.

<> alle waa ka ugu horeeya, waana ka ugu dambeeya, waana ka ugu adag ama og wax walba oo muuqda, waana ka ugu qarsoon ama og wax walba oo qarsoon, allena wax walba kii u cilmi badan weeye>> .

41- Ducada gudista daynka.

-١٣٦ { اللَّهُمَّ اكْفِنِي بِحَلالِكَ عَنْ حَرَامِكَ وَأَغْنِنِي بِفَضْلِكَ عَمَّنْ سِوَاكَ }.

136- {allaahumma-kfinii bixalaalika can

xaraamika, waqninii bifadlika camman siwaaka}.
«allow igaga filansii xalaashaada xaaraantaada, iguna deeqsoonsii(qaniye el)dheeraadkaaga(fadligaaga)waxa kaa soo haray». Cidkasta iga kaafi.

-١٣٧ { اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الهَمِّ وَالحَزَنِ ،وَالعَجْزِ وَالكَسَلِ ، وَالبُخْلِ وَالجُبْنِ،وَضَلَعِ الدَّيْنِ وَغَلَبَةِ الرِّجَالِ }.

137 {allaahumma innii acuudu bika minal hammi wal-xuzni, wal cajzi wal kasali, wal-bukhli wal-jubni, wa dalciddayni wa qalabatirrijaali}.
«allow waxaan kaa magan galayaa, murugo iyo walbahaar, caajis iyo wahsi, bakhaylnimo (gacan-adayg) iyo fulaynimo, ku lugyeelasho dayn (qaamow) iyo adkaanshaha raga».
42. Ducada waswaasida salaada

dhexdeeda iyo qiraa-ada.

-١٣٨ (( أَعَوذُ بِاللّٰهِ مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ وَاتْفُلْ عَلى يَسَارِكَ (ثَلاثاً).

138- {waxaan uga magan galayaa ilaahay shaydaanka la dheereeyey(fogeeyey). u tuf dhinacaaga bidix saddex jeer.

43. Ducada qofka arini ku cuslaato.

-١٣٩ ((اللَّهُمَّ لاَ سَهْلَ إلاَ مَاجَعَلْتَهُ سَهْلاً، وَأَنْتَ تَجْعَلُ الحَزْنَ اِذَا شِئْتَ سَهْلاً)).

139- {allahumma laa sahla illaa maa jacaltahu sahlaa wa anta tajcalu alxazna idaa shi-tahu sahlaa}.

"allow majiro wax sahlan ,waxaad kadhigtay sahal(dhibyaraan)mooyee, adiguna allow waxaad ka dhigtaa dirrida(gawaanka)haddii aad doonto jileec".

44 . Waxa uu dhahayo amase uu yeelayo qofka dambaaba.

-١٤٠ (( مَا مِنْ عَبْدٍ يُذْنِبُ ذَنْباً فَيُحْسِنُ الطُّهُورَ، ثُمَّ يَقُومُ فَيُصَلِّي رَكْعَتَيْنِ، ثُمَّ يَسْتَغْفِرُ اللَّه إلاَّ غَفَرَ اللَّه لَهُ )).

140- {majiro adoon dambaabaya dambi, oo kadibna waysada wanaajinaya,kadibna istaagaya oo tukanaya laba rakcadood, kadibna waydiisanaya ilaahay dambi dhaaf ,haddii uu jiro ilaahay wuu u dambidhaafayaa}.

45.Ducada fiijinta(eryidda) shaydaanka iyo waswaasintiisa.

-١٤١(( الاسْتِعَاذَةُ بِاللَّهِ مِنْهُ )).

141- {ilaahay oo looga magan galo}.

-١٤٢ (( الأَذَانُ)).

142- {adinka} dhagaha oo lagaga adimo qofka.

-١٤٣(( الأَذْكَارُ وَقِرَاءَةُ القُرْآنِ )).

143- {Adkaarta iyo quraanka oo la akhristo}.

46. Ducada qofka ay qabsato arrin uu raali ka-ahayn ama qorshihiisa ka tanroonaatay.

-١٤٤ (( قَدَرُ اللّٰهِ وَمَاشَاءَ فَعَلَ )).

144- {qadarullaahi wamaa shaa-a facal}

"Waa ilaahay qadarkiis, wuxuu doonana wuu sameeyaa".

47. u hanbaliyeenta qofka cunug u dhasho iyo jawaabtiisa.

-١٤٥ (( بَارَكَ اللّٰه لَكَ فِي المَوْهُوب لَكَ، وَشَكَرْتَ الوَاهِبَ، وَبَلَغَ أَشُدَّهُ، وَرُزِقْتَ بِرَّهُ))

وَيَرُدُّ عَلَيهِ المُهَنَّأُ فَيَقُولُ: (( بَارَكَ اللّٰه لَكَ وَبَارَكَ عَلَيكَ، وَجَزَاكَ اللّٰه خَيْراً، وَرَزَقَكَ اللّٰه مِثْلَهُ،وَأَجْزَلَ ثَوَابَكَ)).

145 - {baarakallaahu laka fil-mawhuubi laka, wa shakarta waahiba, wa ballaqa ashuddahu, wa rusiqta birrahu}

"ilaahay ha kuu barakeeyo ilmahan laguu hibeeyay, adigana ilaahay ha kaa

yeelo mid ku shukriya (hibadiisa) ,hana gaarsiiyo hanaqaadkiisa (xoogiisa), ha lagugu irsaaqana wanaagiisa iyo baarinimadiisa".

Wuxuu ugu jawaabayaa waalidka ilmaha dhalay:( baarakallaahu laka wa baaraka calayka wa jazaakallaahu khayraa, wa rasaqaka allaahu mithlahu wa ajzala thawaabaka).

< ilaahay hakuu barakeeyo, korkaagana ha barakeeyo, khayrna ha kugu abaal mariyo, hana kugu irsaaqo isagoo kale, hana weyneeyo ajirkaaga >.

48-Ducada lagaga naaro caruurta shaydaanka.

-١٤٦ كَانَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمْ: يُعَوِّذُ الحَسَنَ وَالحُسَيْنَ رَضِيَ اللَّه عَنْهُمَا (( أُعِيذُكُمَا بِكَلِمَاتِ اللَّهِ التَّامَّةِ مِنْ كُلِّ شَيْطَانٍ وَهَامَّةٍ، وَمِنْ كُلِّ عَيْنٍ لامَّةٍ )).

146- { wuxuu ahaa rasuulku s.c.w kii uga naara shaydaanka xassan iyo xusseen alle ha karaali ahaadee (( uciidukumaa bikalimaatillaah attaammati min kulli shaydaanin wa haammah, wa min kulli caynin laammah}.

"waxaan idinkugu magangalinayaa kalmadaha ilaahay ee dhamayskatiran shaydaankasta iyo halaq iyo qarjaajuf walba, iyo il kasta oo wax dhabata (ilaysa)".

57.Ducada bukaanka marka labooqa-nayo.

١٤٧- (( لاَبَأسَ طَهُورٌ إنْ شَاءَ اللّٰه ))

147- {laa ba-sa dahuurun inshaa allaah}

< dhibaato malaha waa dambi-dhaqid inshaa allaah".

١٤٨- (( أَسْأَلُ اللّٰه العَظِيمَ رَبَّ العَرْشِ العَظِيمِ أَنْ يَشْفِيَكَ )) ( سَبْعَ مَرَّاتٍ).

148- { as-alullaahalcadiim rabbal-carshil-cadiimi an yashfiyaka} todoba jeer.

"waxaan weydiisanayaa ilaahayga weyn, ee ah rabiga carshiga weyn in uu ku shaafiyo".

50- Fadliga booqashada qofka jiran (buka).

-١٤٩ قَالَ صلَّى اللّٰه عليه وسلم ((إذَا عَادَ الرَّجُلُ أَخَاهُ المُسْلِمَ مَشَى فِي خِرافَةِ الجَنَّةِ حَتَى يَجْلِسَ، فَإِذَا جَلَسَ غَمَرَتْهُ الرَّحْمَةُ، فَإِنْ كَانَ غُدْوَةً صَلَّى عَلَيْهِ سَبْعُونَ أَلْفَ مَلَكٍ حَتَى يُمْسِيَ، وَإِنْ كَانَ مَسَاءً صَلَّى عَلَيهِ سَبْعُونَ أَلْفَ مَلَكٍ حَتَى يُصْبِحَ)).

149- Wuxuu yiri rasuulku s.c.w: {haddii uu booqdo ninku walaalkiisa muslinka ah, wuxuu ku sugnaanayaa intuu sii socdo mira gurashada  jannada illaa uu ka fariisto, haddii uu fariisto, waxaa daboolaysa

naxariis, haddii aytahay subaxna waxaa ku saliyaya todobaatan malag illaa uu ka galabaysto, haddii aytahay galabna waxaa ku saliyaya todobaatan malag illaa uu ka waabariisto} .

51- Ducada bukaanka haddii uu ka quusto noloshiisa.

١٥٠- (( اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي وَارْحَمْنِي وَأَلْحِقْنِي بِالرَّفِيقِ الأَعْلَى))

150- {allahumma iqfir lii war xamnii wa al-xiqnii birrafiiqil aclaa}.

"allow ii dambi dhaaf, iina naxariiso, i haleelsiina saaxiibka sare". Oy kamid yihiin anbiyadii saalixiintii shuhadadii iyo runsheegayaashii.

١٥١- (( جَعَلَ النَّبِيُّ صلى الله عليه وسلم عِنْدَ مَوْتِهِ يُدْخِلُ يَدَيْهِ فِي المَاءِ فَيَمْسَحُ بِهِمَا وَجْهَهُ وَيَقُولُ: لا إلهَ إلا اللَّه إنَّ لِلْمَوْتِ سَكَرَاتٍ)).

151- { Wuxuu galin jiray nabigu s.c.w ga-

cantiisa biyaha markii uu geeriyoonayay, markaasuu ku masasixi jiray wajigiisa isagoo dhahaya: ( laa ilaaha illallaah, mawtku wuxuu leeyahay sakaraad).

١٥٢- ((لا إله إلا اللّٰه وَاللّٰه أَكْبَرُ، لاإله إلا اللّٰه وَحْدَهُ، لاإله إلا اللّٰه وَحْدَهُ لا شَرِيكَ لَهُ، لا إله إلا اللّٰه لَهُ الْمُلْكُ وَلَهُ الْحَمْدُ، لا إله إلا اللّٰه وَلا حَوْلَ وَلا قُوَّةَ إلا بِاللّٰهِ )).

152- { Laa ilaaha illallaahu wallaahu akbar, laa ilaaha illallaahu waxdahu, , laa ilaaha illallaahu waxdahu, laa shariika lahu, laa ilaaha illalaahu lahul-mulku wa lahul xamu, laa ilaaha illaahu walaa xawla walaa quwwata illaa billaah}.

< ilaah majiro xaq lagu caabudo ilaahay mooyee, allaana weyn, ilaah majiro xaq lagu caabudo ilaahay mooyee kaligii , ilaah majiro xaq lagu caabudo ilaahay mooyee kaligii, malaha shariig

(wadaage), ilaah majiro xaq lagu caabudo ilaahay mooyee, waxaa u sugan boqornimada, waxaana u sugan mahadda, ilaah majiro xaq lagu caabudo ilaahay mooyee, xeelad iyo awoodna cidna uma sugna ilaahay mooyee>> .

52- U qabashada shahaadada qofka sakaraadaya.

-١٥٣ ( مَنْ كَانَ آخِرُ كَلامِهِ لا إلهَ إلا اللّٰه دَخَلَ الجَنَّةَ)).

153- {qofka uu yahay waxa ugu dambeeya hadalkiisa laa ilaaha illallaahu, jannada ayuu galayaa}.

53.Ducada qofka dhibaato qabsato.

-١٥٤ (( إِنَّا للّٰهِ وَإِنَّا إِلَيْهِ رَاجِعُونَ اللَّهُمَّ أَجُرْنِي فِي مُصِيبَتِي وَأَخْلِفْ لِي خَيْراً مِنْهَا))

154- {innaa lillaahi wa innaa ilayhi raajicuun allahumma-ajurnii fii musiibatii wakhlif lii khayran minhaa}

"ilaahay ayaan u sugnaanay(ilaahy baa na leh) , anaguna xaggiisaan u noqonaynaa, allow iga ajir sii dhibaatadayda, iiguna badal wax ka khayr badan".

54. Ducada marka indhaha loo laabayo maydka.

١٥٥- ((اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِفُلَانٍ (باسمه) وَارْفَعْ دَرَجَتَهُ فِي الْمَهْدِيِّينَ وَاخْلُفْهُ فِي عَقِبِهِ فِي الْغَابِرِينَ، وَاغْفِرْ لَنَا وَلَهُ يَارَبَّ الْعَالَمِينَ، وَافْسَحْ لَهُ فِي قَبْرِهِ وَنَوِّرْ لَهُ فِيهِ)).

155- {allaahumma iqfir li fulaan (magaciisa ayuu sheegi) warfac darajatahu filmahdiyiin, wakhlufhu fii caqibihi fillqaabiriin,waqfir lanaa walahu yaa rabbal-caalamiin, wafsax lahu fii qabrihi wa nawir lahu fiihi}

"allow u dambi dhaaf hebal (wuu magacaabayaa) darajadiisana allow kor

u qaad kuwa lahanuuniyay dhexdooda, allow ilaali cidhibtiisa dambe,kuwaharay dhexdooda, noona dambi dhaaf anaga iyo isagaba caalamiinta rabigoodow, allow u waasici qabrigiisa, una nuuri”.

55. Ducada maydka marka lagu tukanayo.

١٥٦- ((اللَّهُمَّ اغْفِرْ لَهُ وَارْحَمْهُ ، وَعَافِهِ وَاعْفُ عَنْهُ، وَأَكْرِمْ نُزُلَهُ وَوَسِّعْ مُدْخَلَهُ، وَاغْسِلْهُ بِالْمَاءِ وَالثَّلْجِ وَالْبَرَدِ، وَنَقِّهِ مِنَ الْخَطَايَا كَمَا نَقَّيْتَ الثَّوْبَ الأَبْيَضَ مِنَ الدَّنَسِ، وَأَبْدِلْهُ دَارًا خَيْراً مِنْ دَارِهِ وَأَهْلاً خَيْراً مِنْ أَهْلِهِ وَزَوْجاً خَيْراً مِنْ زَوْجِهِ وَأَدْخِلْهُ الْجَنَّةَ وَأَعِذْهُ مِنَ عَذَابِ الْقَبْرِ))(وعَذَابِ النَّارِ).

156- {allaahumma iqfir lahu warxamhu, wa caafihi wacfu canhu, wa akrim nuzulahu, wa wasic mudkhalahu, waqsilhu bilmaa-i  wa thalji wal-barad, wanaqqihi minal-khadaayaa kamaa yunaqqathaw-

bal abyadi minaddanasi, wa abdilhu daaran khayran min daarihi wa ahlan khayran min ahlihi, wa zawjan khayran min zawjihi wa adkhilhu al-jannata wa acid-hu min cadaabil-qabri}

"allow u dambi dhaaf, una naxariiso, caafina allow una caffi, wanaajina meesha uu dagayo, una waasici meesha uu galayo, kuna dhaq allow biyo, baraf iyo qabow, kana nadiifi dambiyada sida looga nadiifiyo marada cad wasakhda, uguna badal allow daartiisa daar ka khayr badan iyo ehel ehelkiisa ka khayr badan iyo xaas xaaskiisa ka khayr badan, galina janno, kana badbaadi cadaabka qabriga" iyo cadaabka naarta.

١٥٧- ((اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِحَيِّنَا وَمَيِّتِنَا، وَشَاهِدِنَا وَغَائِبِنَا، وَصَغِيرِنَا وَكَبِيرِنَا، وَذَكَرِنَا وَأُنْثَانَا. اللَّهُمَّ مَنْ أَحْيَيْتَهُ مِنَّا فَأَحْيِهِ عَلَى الإِسْلَامِ،وَمَنْ

تَوَفَّيْتَهُ مِنَّا فَتَوَفَّهُ على الإِيْمَانِ، اللهُمَّ لا تَحْرِمْنَا أَجْرَهُ وَلا تُضِلَّنَا بَعْدَهُ)).

157- {allaahumma aqfir lixayyinaa wa mayyitinaa, wa shaahidinaa wa qaa-ibinaa, wa saqiirinaa wa kabiirinaa, wa dakarinaa wa unthaanaa. Allaahumma man axyaytahu minnaa fa axyihi calal-islaami,wa man tawaffaytahu fa tawaffa-hu calal-iimaani, allaahumma laa taxrim-naa ajrahu walaa tudillanaa bacdahu}.

<>allow u dambi dhaaf keena nool iyo keena dhintay, keena jooga iyo keena maqan, keena yar iyo keena weyn, keena lab iyo keena dhadig. Allow kaad noolayso oo naga mid ah, ku noolee islaamka, kaad oofsatana ku oofso iimaanka, allow ha naseejin ajirkiisa, hana na baadiyayn gadaashiisa>>.

١٥٨- (( اللَّهُمَّ إِنَّ فُلانَ بْنَ فُلانٍ فِي ذِمَّتِكَ، وَحَبْلِ

جِوَارِكَ. فَقِهِ مِنْ فِتْنَةِ الْقَبْرِ وَعَذَابِ النَّارِ، وَأَنْتَ أَهْلُ الْوَفَاءِ وَالْحَقِّ. فَاغْفِرْ لَهُ وَارْحَمْهُ إِنَّكَ أَنْتَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ )).

158- { Allahumma inna fulaanabna fulaanin, fii dimmatika, wa xabli jiwaarika, faqihi min fitnatil-qabri wa cadabinnaar, wa anta ahlul-wafaai wal-xaqqi, faqfir lahu warxamhu innaka antal-qafuurur-raxiim}

<> allow hebal hebal wuxuu ku jiraa balankaaga (amaankaaga), iyo xariga magantaada, ee ka ilaali fidnada qabriga iyo cadaabka naarta, adigu allow waxaad ehel u tahay ballan-oofinta, iyo xaqqa, ee allow u dambi dhaaf oo u naxariiso,  adigu waxaad tahay dambi dhaafe naxariis badan».

-١٥٩ (( اللَّهُمَّ عَبْدُكَ وَابْنُ أَمَتِكَ احتَاجُ إِلى رَحْمَتِكَ، وَأَنْتَ غَنِيٌّ عَنْ عَذَابِهِ، إِنْ كَانَ مُحْسِناً

فَزِدْ فِي حَسَنَاتِهِ، وَإِنْ كَانَ مُسِيْئاً فَتَجَاوَزْ عَنْهُ
)).

159- {Allamma cabduka, wabnu amatika axtaaju ilaa raxmatika, wa anta qanniyun can cadaabihi, in kaana muxsinan fazid fii xasanaatihi, wa in kaana musii-an fa tajaawaz canhu}.

< allow waa adoonkaagii, iyo inankii adoontaada, wuxuu u baahanahay naxariistaada, adiguna waad ka maarantaa cadaabiddiisa, haddii uuu yahay sama-fale u kordhi samihiisa, haddii uu yahyna xumaan-fale, u cafi oo u dhaaf >.

56- Ducada ilamaha saqiiray marka lagu tukanayo.

-١٦٠ (( اللَّهُمَّ أَعِذْهُ مِنْ عَذَابِ القَبْرِ)). وَإِنْ قَالَ :
(( اللَّهُمَّ اجْعَلْهُ فَرَطًا وَذُخْراً لِوَالِدَيْهِ، وَشَفِيعًا
مُجَاباً. اللَّهُمَّ ثَقِّلْ بِهِ مَوَازِينَهُمَا وَ أَعْظِمْ بِهِ

أُجُورَهُمَا، وَأَلْحِقْهُ بِصَالِحِ الْمُؤْمِنِينَ، وَاجْعَلْهُ فِيْ كَفَالَةِ إِبْرَاهِيمَ، وَقِهِ بِرَحْمَتِكَ عَذَابَ الْجَحِيمِ، وَأَبْدِلْهُ دَارًا خَيْرًا مِنْ دَارِه، وَأَهْلاً خَيْرًا مِنْ أَهْلِهِ ، اللَّهُمَّ اغْفِرْ لأَسْلافِنَا، وَأَفْرَاطِنَا، وَمَنْ سَبَقَنَا بِالإِيمَانِ )) فَحَسَنٌ.

160- { allahumma acidhu min cadaabil-qabri} haddii uu dhaho: { allahumma ijcalhu faradan wa dukhran liwaalidayhi, wa shafiican mujaaban. Allahumma thaqqil bihi miizaanahumaa, wa acdim bihi ujuurahumaa, wa alxiqhu bisaa-lixil-mu,miniina, wajcalhu fii kafaalatil ibraahiima, wa qihi biraxmatika cadabl-jaxiim, wa abdilhu daaran khayran min daarihi, wa ahlan khayran min ahlihi, allahummaqfir li aslaafinaa, wa afraadi-naa, wa man sabaqanaa bil-iimaani} way fiicantahay.

<>allow ka badbaadi cadaabka qabriga>>

<> allow uga yeel (saqiirkan) hormare iyo kayd waalidkiis, kana dhig ergeeye la ajiibo ergadiisa, allow ku cuslaysii miisaankooda, kuna waynaysii ajirkooda, haleelsiina mu-miniinta wanaagsan, kana yeel kafaalada ibraahiim, kaga ilaalina naxariistaada cadaabka jaxiimo, uguna badal daar ka wanaagsan daartiisa, iyo ehel ka khayr badan ehelkiisa, allow u dambi dhaaf dadkanagii naga horeeyey, iyo saqiiradanadii, iyo qof kastoo iimaanka nooga horeeyey>> .

١٦١- (( اللَّهُمَّ اجْعَلْهُ لَنَا فَرَطاً، وَسَلَفاً ، وَأَجْراً
)).

161- { allahumma ijcalhu lanaa faradan , wa salafan, wa ajraa}.

<> allow nooga yeel hormare(mid noo saqiiray) oo naga hormara, iyo ajir>> .

57- Ducada tacsiyada.

١٦٢- ((إِنَّ لِلَّهِ مَا أَخَذَ. وَلَهُ مَا أَعْطَى وَكُلُّ شَيءٍ عِنْدَهُ بِأَجَلٍ مُسَمًّى... فَلْتَصْبِرْ وَلْتَحْتَسِبْ))

وَإِنْ قَالَ: (( أَعْظَمَ اللَّهُ أَجْرَكَ وَأَحْسَنَ عَزَاءَكَ وَغَفَرَ لِمَيِّتِكَ)) فَحَسَنٌ.

162- {inna lillaahi maa akhada wa lahu maa acdaa, wa kullu shay-in cindahu bi-ajalin musammaa faltasbir wal taxtasib}.

Haddii uu dhaho:

{acdamallaahu ajraka wa axsana cazaa-aka, wa qafara limayyitika}. Way fiicantahay.

"ilaahaybaa leh waxa uu qaatay iyo waxa uu bixiyey, wax kastana agtiisa waqti magacaaban ayuu leeyahay, ee samir,oo xisaabso (ajirka musiibadan)".

"ilaahay ha weyneeyo ajirkaaga, hana wanaajiyo samirkaaga, hana u dami dhaafo qofkan kaa dhintay ".

58- Ducada marka lagalinayo maydka qabriga.

١٦٣- (( بِسْمِ اللّٰهِ وَعَلَى سُنَّةِ رَسُولِ اللّٰهِ )).

163- {bismillahi wa calaa sunnati rasuulillaahi}.

<>magaca alle ayaan ku galinaynaa, iyo sunadii (jidkii) rasuulka ilaahay s.c.w <>.

59.Ducada marka la aaso maydka kadib.

١٦٤- ((اللَّهُمَّ اغْفِرْ لَهُ اللَّهُمَّ ثَبِّتْهُ)).

164- {allahummaqfir lahu allahumma thabithu}

"allow u dambi dhaaf, allow sug}.

60.Ducada booqashada xabaalaha (qubuuraha).

١٦٥- (( السَّلامُ عَلَيْكُمْ أَهْلَ الدِّيَارِ، مِنَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُسْلِمِينَ وَإِنَّا إِنْ شَاءَ اللّٰهُ بِكُمْ لاحِقُونَ(( وَيَرْحَمُ اللّٰهُ الْمُسْتَقْدِمِينَ وَالْمُسْتَأْخِرِينَ )) أَسْأَلُ اللّٰهَ لَنَا وَلَكُمُ الْعَافِيَةَ)).

165- {assalaamu calaykum ahladdiyaari

min mu-miniina wal muslimiina wa innaa inshaa allaahu bikum laaxiquun,wa yarxamullaahu al-mustaqdimiina wal-mustakhiriin as-alullaha lanaa wa lakum al-caafiyata}

"Salaan korkiina ha ahaato ehelka daarahan dagganow oo ah muminiin iyo muslimiinba, anagu haddii ilaahay yiraahdo waan idinsoo haleelaynaa, ilaahayna ha u naxariisto kuweena hore iyo kuweena danbaba, ilaahay waxaan inoo weydiinayaa anaga iyo idinkaba in uu janno na siiyo naga caafiyo cadaabkiisa".

61.Ducada dabaysha.

-١٦٦ ((اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ خَيْرَهَا،وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهَا)).

166- {allahumma innii as-aluka khayrahaa, wa acuudu bika min sharrihaa}.

< allow anigu waxaan ku waydiisanayaa khayrkeeda (dabaysha), waxaana kaa magan-galayaa sharkeeda > .

-١٦٧ (( اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ خَيْرَهَا, وَخَيْرَ مَا فِيْهَا، وَخَيْرَ ما أُرْسِلَتْ بِهِ وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهَا، وَشَرِّ مَا فِيْهَا وَشَرِّ ما أُرْسِلَتْ بِهِ)).

167- {allaahumma innii as-aluka khayra-haa, wa khayra maa fiihaa, wa khayra maa ursilat bihi, wa acuudu bika min sharrihaa wa sharri maa fiihaa, washarri maa ursilat bihi}.

"allow waxaan ku weydiisanayaa khayrkeeda iyo khayrka ku sugan dhexdeeda, iyo khayrka loo soo diray, waxaana kaa magangalayaa sharkeeda iyo sharka ku sugan dhexdeeda, iyo sharka loo soo diray".

62. Ducada onkadka.

١٦٨(( سُبْحَانَ الذِي يُسَبِّحُ الرَّعْدُ بِحَمْدِهِ

وَالْمَلَائِكَةُ مِنْ خِيفَتِهِ)).

168- {subxaanalladii yusabixurracdu bix-amdihi wal malaaikatu min khiifatihi}.

"xumaan ilaahaybaa ka hufan allihii onkadku ku tasbiixsanaya mahadiisa, malaaigtuna ku tasbiixsanayso cabsidiisa darteed".

63. Ducada roobdoonka.

١٦٩- (( اللَّهُمَّ أَسْقِنَا غَيْثاً مُغِيثاً مَرِيئاً مَرِيْعاً، نَافِعاً غَيْرَ ضَارٍّ، عَاجِلاً غَيْرَ آجِلٍ )).

169- { allahumma asqinaa qaythan muqiithan marii-an mariican, naafican qayra daarrin, caajilan qayra aajilin}.

< allow na waraabi roob, na roobeeya(biyo dhiga), jidiinkana mara, doogna noo bixiya, waxna anfacaya waxna aan dhibayn, dagdagna ah oona daahaynin».

١٧٠- ((اللَّهُمَّ أَغِثْنَا، اللَّهُمَّ أَغِثْنَا، اللَّهُمَّ

أَغِثْنَا)).

170-{ Allahumma aqithnaa,
Allahumma aqithnaa,
Allahumma aqithnaa }.

< allow roob nasii, allow roob nasii, allow roob nasii > .

-١٧١ (( اللَّهُمَّ اسقِ عِبَادَكَ، وَبَهَائِمَكَ، وَانشُرْ رَحْمَتَكَ، وَأَحيِي بَلَدَكَ المَيِّتَ))

171- {allaahumma isqi cibaadaka wa bahaaimaka wanshur raxmataka waxyi baladaka almayita}

"allow waraabi adoomahaaga iyo xoolahaaga , faafina naxariistaada, nooleena baladkaagan dhintay(abaarta ah).

64- Ducada marka uu arko roobka.

-١٧٢ ((اللَّهُمَّ صَيِّبًا نَافِعًا )).

172- {allaahumma sayyiban naafican}.

"allow ka dhig roob shubma, oo wax

anfaca".

65-Ducada la dhaho roobka kadib.

-١٧٣ (( مُطِرْنَا بِفَضْلِ اللّٰهِ وَرَحْمَتِهِ)).

173- {mudirnaa bifadlillaahi wa raxmatihi} "waxaa nalagu roobeeyay dheeraadka(gallada) alle iyo naxariistiisa sababteed".

66. Ducooyinka dalbashada roob wareeji nta(hareeramarka).

-١٧٤ (( اللَّهُمَّ حَوَالَينَا وَلا عَلَيْنَا. اللَّهُمَّ عَلَى الآكَامِ وَالظِّرَابِ، وَبُطُونِ الأَوْدِيَةِ، وَمَنَابِتِ الشَّجَرِ)).

174- { allahumma xawaalaynaa walaa calaynaa. Alahumma calal aakaami wa diraabi, wa buduunil awdiyati, wa ma-naabitishshajari}.

< allow geesaha na mari roobka, oo korkanaga ha marin, allow ku da-sii taagaga, iyo buuraha yaryar, iyo togaga

dhexdooda iyo meelaha dhirtu ay ka baxdo».

67.Ducada marka la arko bisha.

١٧٥- (( اللّٰه أَكْبَرُ، اللَّهُمَّ أَهِلَّهُ عَلَيْنَا بِالأَمْنِ وَالإِيمَانِ، وَالسَّلامَةِ وَالإِسْلامِ، وَالتَّوْفِيقِ لِمَا تُحِبُّ رَبَّنَا وَتَرْضَى، رَبُّنَا وَرَبُّكَ اللّٰه)).

175- {allaahu akbar, allaahumma ahilhu calaynaa bil amni wal iimaani, was-salaamati wal-islaami wattowfiiqi limaa tuxibbuhu wa tardaa rabunaa wa rabuka allaahu}.

"ilaahaybaa weyn, allow noogu bilsii bishan amni iyo iimaan, nabadgalyo iyo islaam, iyo waafajin waxa aad jeceshahay, rabiganow, raalina aad katahay, rabiganaga iyo rabigaaguba waa ilaahay".

68. Ducada afurka{marka la afurayo}.

١٧٦- (( ذَهَبَ الظَّمَأُ وَابْتَلَّتِ العُرُوقُ، وَثَبَتَ الأَجْرُ إِن شَاءَ اللّٰه)).

176- {dahaba addamau wabtallatilcuru-uqu, wa thabatal ajru in shaa allaah}. "oonkii wuu tagay, xididadiina wey qoyeen, ajirkiina wuu sugnaaday inshaa alaah".

-١٧٧ ((اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ بِرَحْمَتِكَ الَّتِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ أَنْ تَغْفِرَ لِي)).

177- { allahumma innii as-aluka birax-matika allatii wa sicat kulla shay-in an taqfira lii)).

< allow anigu waxaan kugu waydiisanayaa naxariistaada, taasoo deeqday wax kasta, inaad ii dambi dhaafto > .

69.Ducada cuntada ka hor.

-١٧٨ (( إِذَا أَكَلَ أَحَدُكُمْ طَعَاماً فَلْيَقُلْ بِسْمِ اللَّهِ، فَإِنْ نَسِيَ فِي أَوَّلِهِ فَلْيَقُلْ بِسْمِ اللَّهِ فِي أَوَّلِهِ وَآخِرِهِ)).

178- { haddii cuno midkiin cunto

ha yiraahdo:bismillaah, haddii uu halmaamana marka ugu horaysa ha dhaho{bismillaahi fii awwalihi wa aakhirihi}.

"magaca ilaahay ayaan ku bilaabayaa bilowgiisa iyo aakhirkiisaba".

-١٧٩ (( مَنْ أَطْعَمَهُ اللّٰه الطَّعَامَ فَلْيَقُلْ: اللَّهُمَّ بَارِكْ لَنَا فِيهِ وَ أَطْعِمْنَا خَيْراً مِنْهُ، وَمِنْ سَقَاهُ اللّٰه لَبَناً فَلْيَقُلْ: اللَّهُمَّ بَارِكْ لَنَا فِيهِ وَزِدْنَا مِنْهُ)).

179- {allahumma baarik lanaa fiihi, wa adcimnaa khayran minhu} {allahumma baarik lanaa fiihi, wa zidnaa minhu}

< qofkii uu ilaahay quudiyo quud ha yiraahdo: allow noo barakee, naguna quudi wax ka khayr badan>>

< qofkiiuu ilaahay waraabiyana caano ha yiraahdo: allow noo barakee, noona korddhi (siyaadi) <> .

70- Ducada marka la dhameeyo cuntada.

-١٨٠ (( الحَمْدُ لِلّهِ الذي أطْعَمَني هَذا، وَرَزَقَنيْهِ، مِنْ غَيْرِ حَوْلٍ مِنِّي وَلا قُوَّةٍ )).

180- {alxamdu lillaahi alladii adcamanii haadaa warasaqaniihi min qayri xawlin minnii walaa quwwah}

"waxaa mahad leh allihii igu quudiyay quudkan, iguna irsaaqay, iyadoon jirin xeelad iyo awood xaggayga ka ahaatay>>.

-١٨١ (( الحَمْدُ لِلّهِ حَمْداً كَثيراً طَيِّباً مُبارَكاً فِيهِ، غَيْرَ ( مَكْفِيٍّ وَلا) مُوَدَّعٍ، ولا مُسْتَغْنىً عَنْهُ رَبَّنا )).

181- { alxamdu lillaahi xamdan kathiiran dayyiban mubaarakan fiihi, qayra makfiyin walaa muwadacin, walaa mustaqnan canhu rabbanaa}.

< Mahad ilaahaybaa leh, wuxuuna leeyahay mahad badan oo wanaagsan oo

barakaysan, oo aan laga maarmi karin, lagana tagi karin, lagana deeqtoomi karin rabigayagow>> .

71. Ducada martidu ku dhahdo ninka soorya.

-١٨٢ ((اللَّهُمَّ بَارِكْ لَهُمْ فِيمَا رَزَقْتَهُمْ، وَاغْفِرْ لَهُمْ وَارْحَمْهُمْ)).

182-{allaahumma baarik lahum fiimaa rasaqtahum, waqfir lahum warxamhum} "allow u barakee waxa aad ku irsaaqday, una dambi dhaaf una naxariiso".

72- Ducada haddii uu doono cunid ama cabbid.

-١٨٣ ((اللَّهُمَّ أَطْعِمْ مَنْ أَطْعَمَنِي وَاسْقِ مَنْ سَقَانِي)).

183- {allahumma adcim man adcamanii wasqi man saqaanii}.

"allow quudi qofka i quudiyey , waraabina qofka i waraabiyay". ٧٣- Ducada haddii

uu ka afuro reer.

١٨٤- (( أَفْطَرَ عِنْدَكُمُ الصَّائِمُونَ، وَأَكَلَ طَعَامَكُمُ الأَبْرَارُ، وَصَلَّتْ عَلَيْكُمُ الْمَلَائِكَةُ )).

184- {afdara cindakum assaaimuun, wa akala dacamakumul-abraar, wa sallat calaykum al-malaaikatu}.

<  ha idinka afureen dadka soomani, hana cuneen cuntadiina baariyaalku, hana idinku sallido malaaigtu  > .

74- Ducada qofka soomani dhihi lahaa haddii cunto lakeeno isagoo wali afurin.

١٨٥- ((إِذَا دُعِيَ أَحَدُكُمْ فَلْيُجِبْ، فَإِنْ كَانَ صَائِماً فَلْيُصَلِّ وَإِنْ كَانَ مُفْطِراً فَلْيَطْعَمْ)).
وَمَعْنَى فَلْيُصَلِّ أَيْ فَلْيَدْعُ.

185-[ haddii loo yeero midkiin ha ajiibo, haddii uu soomanyahayna ha duceeyo, haddii uu afuranyahayna ha cuno] .

75. Waxa uu dhahayo qofka soomani

marka lacaayo.

-١٨٦ (( إِنِّي صَائِمٌ إِنِّي صَائِمٌ ))

186- {innii saaim innii saaim}

"anigu waan soomanahay, waan soomanahay".

76- Ducada marka la arko soo bixitaanka (cudhka)miraha.

-١٨٧ (( اللَّهُمَّ بَارِكْ لَنَا فِي ثَمَرِنَا، وَبَارِكْ لَنَا فِي مَدِينَتِنَا، وَبَارِكْ لَنَا فِي صَاعِنَا، وَبَارِكْ لَنَا فِي مُدِّنَا )).

187- {allahumma baarik lanaa fii thamarinaa, wa baarik lanaa fii madiinatinaa, wa baarik lanaa fii saacinaa, wa baarik lanaa fii muddinaa }.

< allow noo barakee midhahannaga, noona barakee magaaladanada, noona barakee saacanaga (halbeeg ٤ mud ) noona barakee mudkanaga(saaca rubuciisa) > .

77.Ducada hindhisada.

-١٨٨ (( إِذَا عَطَسَ أَحَدُكُمْ فَلْيَقُلْ: الْحَمْدُ لِلَّهِ، وَلْيَقُلْ لَهُ أَخُوهُ أَوْ صَاحِبُهُ: يَرْحَمُكَ اللَّهُ ،فَإِذَا قَالَ لَهُ يَرْحَمُكَ اللَّهُ فَلْيَقُلْ:يَهْدِيكُمُ اللَّهُ وَيُصْلِحُ بَالَكُمْ )) .

188- { Haddii uu hindhiso midkiin ha yiraahdo alxamdulillaahi,(mahad ilaahay-baa leh) walaakiisna ama saaxiibkiis ha ku yiraahdo:(yarxamukallaahu)(ilaahay ha kuu naxariisto) marka uu ku dhaho yarx-amukallaah ha yiraahdo:(yahdiikumullaa hu wa yuslixu baalakum)(ilaahay ha idin hanuuniyo, hana hagaajiyo arimihiina).

٧٨.Waxa lagu dhaho gaalka haddii uu hindhiso oo uu yiraahdo alxamdu lillaah.

-١٨٩ (( يَهْدِيكُمُ اللَّهُ وَيُصْلِحُ بَالَكُمْ)).

189- {haddii uu hindhiso gaalku oo uu dhaho alxamdu lillaahi, ku dhe:{yahdiikumullaahu wa yuslixu baala-

kum}
u fiirso gaalka lama dhihin {yarxamukallaahu}{alle ha kuu naxariisto}.waayo gaalku naxariista ilaahay wuu ka fogyahay.

79. Ducada loogu duceeyo qofka guursada.

-١٩٠ ( بَارَكَ اللهُ لَكَ، وَبَارَكَ عَلَيكَ، وَجَمَعَ بَيْنَكُمَا فِي خَيْر)).

190- {baarakallaahu laka wabaaraka calayka wa jamaca baynakumaa fii khayrin} "ilaahay ha kuu barakeeyo, adigana korkaaga ha barakeeyo , khayrna ha idinku kulmiyo".

80- Ducada ninka guursada iyo gadashada gaadiidka.

-١٩١ (( إِذَا تَزَوجَ أَحَدُكُمُ امْرَأَةً ، أَوْ إِذَا اشتَرى خَادِماً؛ فَلْيَقُلْ: اللَّهُمَّ إِنِّي أَسْأَلُكَ خَيْرَهَا ،وَخَيْرَ مَا جَبَلْتَهَا عَلَيْهِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهَا ،وَشَرِّ مَا

جَبَلْتَهَا عَلَيْهِ ، وَإِذَا اشْتَرى بَعِيراً؛ فَلْيَأْخُذْ بِذِرْوَةِ سَنَامِهِ؛ وَلْيَقُلْ مِثْلَ ذَلِكَ )).

191- {allahumma innii as-aluka khayra-haa, wa khayra maa jabaltahaa calayhi, wa acuudu bika min sharrihaa wa sharri maa jabaltahaa calayhi}

< Haddii uu guursado midkiin haweenay, amase soo iibsado adeege, ha yiraahdo: {allow waxaan anigu ku waydiisanayaa khayrkeeda iyo khayrka aad ku abuurtay, waxaana kaa magangalayaa sharkeeda iyo sharka aad ku abuurtay.} haddii uu soo iibsado ritti (awr) ha qabto meesha ugu saraysa kuruskiisa hana dhaho sidii oo kale> .

81- Ducada inta aan loo galmoon xaaska.

-١٩٢ (( بِسْمِ اللهِ، اللَّهُمَّ جَنِّبْنَا الشَّيْطَانَ، وَجَنِّبِ الشَّيْطَانَ مَا رَزَقْتَنَا)).

192 {bissmillaah, allaahumma jannibnaa al-shaydaana wa jannibi-shaydaana maa rasaqtanaa}.

"Magaca ilaahay, allow naga dheeree shaydaanka kana dheeree shaydaanka waxa (awlaada) aad nagu irsaaqday".

82. Ducada xanaaqa.

١٩٣- (( أَعُوذُ بِاللّٰهِ مِنَ الشَّيْطَانِ الرَّجِيمِ)).

193- {acuudu billaahi minashaydaanir-rajiim}

"waxaan ilaahay uga magan galayaa shaydaanka laga dheereeyey naxariista ilaahay".

83. Ducada qofka arka ruux ibtilaysan.

١٩٤- (( الحَمْدُ للّٰهِ الذي عَافَانِي مِمَّا ابْتَلاكَ بِهِ، وَفَضَّلَنِي عَلَى كَثِيرٍ مِمَّنْ خَلَقَ تَفْضِيلاً)).

194- {alxamdu lillaahi alladii caafaanii mimmaa ibtalaaka bihi, wa faddalanii calaa kathiirin mimman khalaqa tafdiilaa}

"waxaa mahad leh allihii iga caafiyay waxa uu kugu ibtileeyay, igana fadilay (doortay) kuwo badan oo uunkiisa kamid ah".

84. Waxa lagu dhaho fadhiga.

-١٩٥عَن ابْن عُمَرَ رَضِيَ اللّه عَنْهُمَا قَالَ:كَانَ يُعَدُّ لِرَسُولَ اللّهِ صَلى اللّه عليهِ وسلم في الْمجلِس الوَاحِدِ مائةُ مَرَّةٍ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَقُومَ: (( رَبِّ اغْفِرْ لِيْ،وَتُبْ عَلَيَّ، إِنَّكَ أَنْتَ التَّوَّابُ الغَفُورُ)).

195- { Waxaa laga wariyey ibnu cumar (r.c) inuu yiri: waxaa loo tiring-jiray rasuulka alle s.c.w halkii fadhiba boqol mar oo uu yiraahdo inta uusan kicin:{ rabbiqfir lii wa tub calayya, innaka antattawwaabulqafuuru}.

<> rabbiyow ii dambi dhaaf oo iga toobad aqbal, adigu waxaad tahay toobad aqbal badane dambi dhaaf badan>>.

85- Xaq gudka fadhiga.

١٩٦- (( سُبْحَانكَ اللَّهمَّ وَبحَمْدِكَ، أَشهدُ أَنْ لا إله إلا أَنْتَ، أَستغفرُكَ وأتوبُ إليكَ)).

196- {Subxaanakallaahunna wa bixam-dika ash-hadu an laa ilaaha illaa anta astaqfiruka wa atuubu ilayk}
"allow  xumaan waad ka hufantahay mahadna adaa leh, waxaan qirayaa inuusan jirin ilaah xaq lagu caabudo adiga mooyee, dambi dhaaf ayaan ku weydiisanayaa ,waana kuu toobad keenayaa".

86.Ducada qofka kugu yiraahda ilaahay hakuu dambi dhaafo.

١٩٧- ( وَلَكَ).

197-  "adigana ilaahay hakuu dambi dhaafo".

87. Ducada qofka kuu sameeya wanaag(macruuf).

١٩٨- (( جَزَاكَ اللّٰهُ خَيْراً))

198-{jasaakallaahu khayran}» ilaahay khayr ha kugu abaalmariyo>>.

88- Waxa uu kaaga reebayo ilaahay (fitnada) masiixi-dajaalka.(dajaal cawar).

١٩٩- ((مَنْ حَفِظَ عَشْرَ آياتٍ مِنْ أَوَّلِ سُورَةِ الكَهْفِ، عُصِمَ مِنَ الدَّجَّالِ)).

(( والاستعاذة بالله من فتنته، عقب التشهد الأخير، من كل صلاةٍ)).

199- {qofkii xafida toban aayadood oo kamida billowga suurada alkahfi , waa laga ilaaliyay dajjaal cawar fidnadiisa}.

Waxaa kaloo kaa ilaalinaya dajaal cawarka U  magan-galka aad uga magan gasho ilaahay fidnadiisa salaad kasta ataxiyaatkeeda danbe.

89- Ducada qofkii kugu dhaha ilaahay dartii ayaan kuu jecelahay.

٢٠٠ (( أَحَبَّكَ الذي أَحْبَبْتَنِي لَهُ)) .

200- {axabbakalladii axbabtanii lahu}

"haku jeclaado allihii dartiis aad ii jeclaa-tay".

90. Ducada qofka kuu bandhiga xoolihiisa.

-٢٠١ (( بَارَكَ اللّٰهُ لَكَ فِيْ أَهْلِكَ و مَالِكَ)).

201- { Baarakallaahu laka fii ahlika wa maalika}

<> ilaahay ha kuu barakeeyo ehelkaaga iyo hantidaadaba>>.

91.Ducada loogu duceeyo qofka daymiya marka loo gudayo (daynka)

-٢٠٢ (( بَارَكَ اللّٰهُ لَكَ فِيْ أَهْلِكَ و مَالِكَ، إِنَّمَا جَزَاءُ السَّلَفِ الحَمْدُ وَالأَدَاءُ)).

202- { Baarakallaahu laka fii ahlika wa maalika innamaa jazaaussalafi alxamdu wal adaau}.

< ilaahay ha kuu barakeeyo ehelkaaga iyo hantidaadaba, abaalka daynku waa

mahadnaq iyo gudid>>.

92. Ducada ka cabsiga shirkiga.

٢٠٣- (( اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ أَنْ أُشْرِكَ بِكَ وَأَنَا أَعْلَمُ, وأستغفرَكَ لِمَا لا أَعْلَمُ )).

203- { allahumma innii acuudu bika an ushrika bika wa anaa aclamu, wa astaq-firuka limaa laa aclamu}

< allow anigu waxaan kaa magan galayaa inaan kuu shariik yeelo anigoo ogsoon, waxaana dambidhaaf kaa waydiisanayaa waxa aanan ogayn>> .

93-Ducada qofka ku yiraahda ilaahay haku barakeeyo.

٢٠٤- ((وَفِيكَ بَارَكَ اللّٰهُ )).

204- {wa fiika baarakallaahu}.

< adigana ilaahay haku barakeeyo > .

94 - Ducada nicidda baasaysiga.

٢٠٥- (( اللَّهُمَّ لا طَيْرَ إلا طَيْرُكَ، وَلا خَيْرَ إلا خَيْرُكَ، وَلا إِلَهَ غَيْرُكَ )).

205- {allahumma laa dayra illaa dayruka, walaa khayra illaa khayruka, walaa ilaaha qayruka}

< allow baasayse majiro waxaad baas kadhigto mooyaane, khayrna majiro khayrkaaga mooyaane, ilaah xaq lagu caabudo majiro adiga mooyee.

95- Ducada gaadiidka

٢٠٦- (( بِسْـمِ اللّٰهِ ، الحَمْدُ للّٰهِ ( سـبحان الـذي سـخر لنَا هذَا وما كـنا لـه مـقرنين وإنا إلـى ربـنا لمنقلبون) الحَمْدُ للّٰهِ، ، الحَمْدُ للّٰهِ، ، الحَمْدُ للّٰهِ، اللّٰه أَكْبَرُ، اللّٰه أَكْبَرُ، اللّٰه أَكْبَرُ، سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ إِنِّي ظَلَمْتُ نَفْسِي، فاغْفِرْ لِي، فَإِنَّهُ لا يَغْفِرُ الذُّنوبَ إلا أَنْتَ )).

206-{ Bismillaah, alxamdu lillaah{subxaanalladii sakhkhara lanaa haadaa, wa maa kunnaa lahu muqriniin, wa innaa ilaa rabbinaa la munqalibuun, alxamdu lillaahi, alxamdu lillaahi, alx-

amdu lillaahi, allaahu akbaru, allaahu akbaru, allaahu akbaru, subxaanakal-lahumma innii dalamtu nafsii faqfir lii, fa-innahu laa yaqfiruddunuuba illaa anta}.
< magaca ilaahay ayaan ku fuulayaa, mahadna ilaahaybaa leh,{ waxaa xumaan ka nasahan eebaha noosahley kan,mana nihin kuwo kara leyligiisa) anaguna xagga eebahanno yaannu u gadoomeynaa.),mahadna ilaahay baa leh, mahadna ilaahay baa leh, mahadna ilaahay baa leh,ilaahaybaa wayn, ilaahaybaa wayn, ilaahaybaa wayn, nasahnaantaada, allow anigu waxaan dulmiyey naftayda, ee ii dambi dhaaf, ma dhaafo dambiyada adiga mooyee > .

96-Ducada socdaalka (safarka).

-٢٠٧ ((اللّٰه أَكْبَرُ، اللّٰه أَكْبَرُ، اللّٰه أَكْبَرُ (
سبحان الذي سخر لنا هذا وما كنا له مقرنين

وإنا إلى ربنا لمنقلبون)  اللَّهُمَّ إنَّا نَسْأَلُكَ فِي سَفَرِنَا هَذا البِرَّ وَالتَقْوَى ،وَمِنَ العَمَلِ مَا تَرْضَى ، اللَّهُمَّ هَوِّنْ عَلَيْنَا سَفَرَنَا هَذا وَاطوِ عَنَّا بُعْدَهُ ، اللَّهُمَّ أنتَ الصَّاحِبُ فِي السَّفَرِ وَالخَلِيفَةُ فِي الأهْلِ ، اللَّهُمَّ إنِّي أعُوذُ بِكَ مِنْ وَعْثَاءِ السَّفَرِ ، وَكَآبَةِ المَنْظَرِ ، وَسُوْءِ المُنْقَلَبِ فِي المَالِ وَالأهْلِ ، وإذا رجع قالهن وزادَ فيهِنَّ :{آيِبُونَ ، تَائِبُونَ ، عَابِدُونَ ، لِرَبِنَا حَامِدُونَ }.

207- {allaahu akbar, allaahu akbar, allaahu akbar, «subxaanalladii sakhkhara lanaa haadaa wamaa kunnaa lahuu muqriniin wa innaa ilaa rabbinaa la munqalibuun}
{allaahumma innaa nas-aluka fii safarinaa haadaa al-birra wa taqwaa, wa minal camali maa tardaa, allaahumma hawwin calaynaa safaranaa haadaa, wadwi cannaa bucdahu, allaahumma anta saaxibu fissafri, wal khaliifatu fil-

ahli,allaahumma innii acuudu bika min wacthaa-issafari, wa ka-aabatil mandari, wa suu-il munqalabi fil-maali wal-ahli}
« Eebaa weyn, eebaa weyn, eebaa weyn, { waxaa nasahan eebaha noosahley kan,mana nihin kuwo kara leyligiisa) anaguna xagga eebahanno yaannu ayaan u gadoomaynaa.)
Allow waxaan ku waydiisanaynaa socdaalkayagan, wanaag iyo taqwo (cabsi) iyo camal aad raali ka tahay, allow noo dhib-yaree safarkanagan, fogaanshihiisana,noo soo duub, allow adigaa ah saaxiibka safarka, iyo ka aan ku dhawrayno ehelka, allow waxaan kaa magan galayaa rafaadka safarka, iyo muuqaal xumo, iyo gadoon xumo xoolihii iyo reerkii» marka uu soo laabto wuxuu dhihi: waan soo laabanay annagoo

toobadkeen ah, caabudaynana ilaahay, rabigayagana mahadinayno>> .

97-Ducada galidda tuulada ama magaalada.

٢٠٨- (( اللَّهُمَّ رَبَّ السَّمَاواتِ السَّبْعِ وَمَا أَظْلَلْنَ، وَرَبَّ الأَرَضِينَ السَّبْعِ وَمَا أَقْلَلْنَ، وَرَبَّ الشَّيَاطِينِ وَمَا أَضْلَلْنَ، وَرَبَّ الرِّيَاحِ وَمَا ذَرَيْنَ. أَسْأَلُكَ خَيْرَ هَذِهِ القَرْيَةِ وَخَيْرَ أَهْلِهَا، وَخَيْرَ مَا فِيْهَا وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ شَرِّهَا، وَشَرِّ أَهْلِهَا وَشَرِّ مَا فِيهَا )).

208- {allahumma rabbassamaawaati sabci wamaa adlalna, wa rabbal-ardiina wamaa aqlalna, wa rabbashayaadiini wamaa adlalna, wa rabba riyaaxi wa maa darayna. As-aluka khayra haadihi al-qaryati wa khayra ahlihaa, wa khayra maa fiihaa, wa acuudu bika min shar-rihaa, wa sharri ahlihaa, wa sharri maa

fiihaa}

< allow rabbigii todobada cirar iyo waxay hadheeyeen rabigooda ahaayow, todobada dhulna iyo waxa ay sidaan rabigooda ahaayow, shayaadiinta iyo waxa ay duufsadeen (lumiyeen) rabigooda ahaayow, dabaylahana iyo waxa ay kiciyeen rabigooda ahaayow, waxaan ku waydiisanayaa khayrka tuuladan iyo khayrka ehelkeeda, iyo khayrka ku dhex sugan. Waxaana kaa magan galayaa sharkeeda iyo sharka ehelkeeda iyo sharka ku dhex sugan >.

98- Ducada galidda Suuqa.

٢٠٩- (( لا إِلـه إِلا اللّه وَحْـدَهُ لا شَـريكَ لَـهُ، لَـهُ المُلْـكُ وَلَـهُ الحَـمْـدُ، يُحْـيي وَيُمـيتُ وَهُـوَ حَـيٌّ لا يَمـوتُ، بِيَـدِهِ الخَـيْرُ، وَهُـوَ عَلـى كُـلِّ شَـيءٍ قَـديرٌ)) .

209- {laa ilaaha illallaahu waxdahu, laaa shariika lahu lahulmulku wa lahulxamdu

yuxyii wa yumiitu wa huwa calaa kulli shay-in qadiir}

"ilaah xaq lagu caabudo majiro ilaahay mooyee, kaligii malahana cid wax la wadaagta, wuxuu leeyahay boqornimo wuxuuna leeyaahay mahadda, isagaa wax nooleeya, isagaanaa wax dila, wuuna noolyahay nolal daaim ah, mana dhinto, gacantiisa ayuu khayrku ku sugan yahay, wax kastana wuu karaa".

99- Ducada marka uu turaanturoodo gaadiidka aad fuushantahay.

-٢١٠ (( بِسْـمِ اللّٰهِ )).

210- { bismillaahi} « magaca ilaahay>> .

100- Ducada musaafirku ugu duceeyo ka dagan.

-٢١١(( أَسْـتَوْدِعُـكُـمُ اللّٰه الـذِي لا تَضِـيْعُ وَدَائِعُـهُ )).

211- { Astawdicikumullaaha alladii laa

tadiicu wadaa-icuhu }.

<  waxaan idinku amaanaynayaa eebaha amaanadiisu lumin  > .

101- Ducada daganuhu ugu duceeyo socotada (musaafirka).

٢١٢- ((أَسْتَوْدِعُ اللّٰهُ دِينَكَ ،وَأَمَانَتَكَ، وَخَوَاتِيمَ عَمَلِكَ )).

212- { astawdicullaaha diinaka, wa amaanataka, wa khawaatiima camalika }.

<> waxaan ilaahay kaaga dalbayaa ammaangalin diintaada iyo amaanadaada iyo khaatumada camalkaaga>> .

٢١٣- (( زَوَّدَكَ اللّٰهُ التَّقْوَى، وَغَفَرَ ذَنْبَكَ، وَيَسَّرَ لَكَ الخَيْرَ حَيْثُ مَا كُنْتَ )).

213-{ sawwadakallaahu attaqwaa, wa qafara danbaka, wa yassara laka al-khayra xaythu maa kunta}.

<  ilaahay sahay ha kaaga yeelo cabsidiisa, hana kuu kordhiyo taqwo

(cabsi) dambigaagana ha dhaafo, hana kuu sahlo khayrka meel aad joogtaba>> .

102- weynayta ilaahay, iyo hufitaanka oo la badiyo inta socodka (safarka) lagu gudo jiro.

٢١٤- (( قال جابر رضي اللّٰه عنه: ((كُنَّا إِذَا صَعَدْنَا كَبَّرْنَا، وَإذا نَزَلْنَا سَبَّحْنَا )).

214- <> wuxuu yiri jaabir alle ha ka raali ahaadee: { waxaan ahayn marka aan kor fuulno kuwii yiraahda (allaahu akbar), haddii aan hoos u dagnana waxaan ahayn kuwii yiraahda (subxaanallaah) <> .

103- Ducada musaafirka marka uu hiraabsado(suxuursada).

